

Asylum Support Partnership

help and advice



January 2010

Somali

Lacagaha hooyada la siiyo ee waalidka weydiistay magangalyada

Haddii aad taageerada magangalyada ka heshid Hay'adda Xuduudka ee Boqortooyada Midowday (UK Border Agency - UKBA), oo aad uur leedahay ama haddii aad leedahay caruur da'doodu ka yar tahay saddex jir waxa laga yaabaa inaad xaq u leedahay lacag dheeraad ah. Qoraalkani waxa uu sharaxayaa lacag-siinta la heli karo iyada oo ku xidhan nooca taageerada aad heshid iyo waxa aad u baahan tahay inaad sameysid si aad u heshid. Si aad u heshid dhamaan taageerada dheeraad ah waa inaad raacdid dhamaan talaabooyinka lagu sharaxay hoos gudaha wakhtiyada la sheegay.

Lacag-siin kaash ah oo ah tobaadle

Inta aad uurka leedahay iyo marka ilmahaagu dhasho, waxa aad lacag dheeraad ah ka heli kartaa UKBA. Marka aad uur leedahay waxa aad weydiisan kartaa £3 oo dheeraad ah todobaadkii. Marka ilmahaagu dhasho, iyo ilaa ilmahaagu ka gaadhayo hal sanno, waxa aad xaq u yeelan doontaa £5 oo dheeraad ah todobaadkii. Marka ilmahaagu gaadho hal sanno waxa aad wali xaq u yeelan doontaa £3 oo dheeraad ah todobaadkii ilaa ilmahaagu ka gaadhayo 3 sanno. Marka ilmuhu gaadho da'da saddex sanno lacagta taageerada dheeraadka ah waa la joojin doonaa waxana uu qadarka taageerada ee todobaadkii noqon doonaa gunnada ama lacagta UKBA bixiyo todobaadkii ee wakhtigaas loogu talagalay waalidka iyo caruurta.

Haddii aad heshid taageerada Qaybta 4 (Section 4 support), waxa aad codsan kartaa lacag-siin la mid ah. Waxa intaa dheer marka ilmahaagu dhasho waxa aad weydiisan kartaa £5 todobaadkii oo dheeraad ah oo aad ku bixisid dharka ilmahaaga ilaa ilmahaagu ka gaadhayo da'da 16 jir. Dhamaan lacag-siinta dheeraadka ah waxa lagu dari doonaa kaadhkaaga lacag-siinta ee Azure. Haddii aad horeba u lahayd caruur da'doodu ka yar tahay 18 jir, waa in aanay jirin wax xadeynaya qadarka taageerada ee kuugu wareegaysa kaadhka Azure min todobaad ilaa todobaadka ku xiga. Haddii ilmuhu yahay kii kuugu horeeyay, waa in UKBA joojiso xadka wareejinta £5 marka lagu siiyo lacag-siinta hooyada.

Lacag-siin hooyo oo dheeraad ah oo ah hal mar

Marka ilmuhu dhasho adiga oo qaata taageerada magangalyada ee caadiga ah, waxa kale oo aad xaq u leedahay lacag-siin dheeraad ah oo ah £300 oo ah hal mar si loo daboolo kharashka iibinta dharka iyo alaabta ilmaha. Haddii aad dhashid mataano waxa aad xaq u leedahay £600, oo ah £300 halkii ilmo. Waa inaad taas weydiisatid wakhti aan ka horeyn lix todobaad marka ilmahaagu dhalan doono ama aan ka dambeyn laba todobaad ka dib marka ilmahaagu dhasho.

Haddii aad qaadatid taageerada Qaybta 4, waxa aad weydiisan kartaa lacag-siin dheeraad ah oo ah £250 halkii ilmo. Haddii ay kuu dhalanayaan mataano waxa aad xaq u leedahay £500. Waxa taas lagu dari doono lacagta laguugu shubo kaadhkaaga Azure. Waa inaad taas weydiisatid

Qoraalo kale oo tarjuman ayaa laga heli karaa <http://languages.refugeecouncil.org.uk>

wakhti aan horeyn sideed todobaad marka ilmahaagu dhalan doono, ama aan ka dambeyn lix todobaad ka dib marka ilmahaagu dhasho.

Maxaa la rabaa inaan sameeyo iyo goorma?

Si aad u heshid lacag-siintaas waa inaa coodsi qoraal ah oo saxeexan u soo dirtid UKBA. Haddii aad taageerada Qaybta 4 ka heshid UKBA waa inaad dhamaan codsiyadaas sameysid adiga oo isticmaalaya warqadda ama foomka Lacag-siinta Dheeraad ah ee Qaybta 4 (Section 4 Additional Payments Form) oo aad calaamadeysid dhamaan sanduuqyada haboon. Waa inaad codsiyada u soo dirtid shaqaalaha kiiska (case owner) ee ku qaabilsan. Haddii aanad lahayn shaqaale kiis waa inaad warqad u soo dirtid xafiiska gobolka ee UKBA.

Codsi kasta oo aad sameynaysid waa inaad dukumentiyada asalka ah u soo dirtid waxana kuu soo celin doonta UKBA. Waa inaad koobiyo ka sameysatid codsiyada iyo dukumentiyadaada si ay aad kayd kuugu noqdaan. Waa inaad dhamaan codsiyada iyo dukumentiyada asalka ah ku soo dirtid habka loo yaqaan geyn diiwaansan (recorded delivery) (taas weydii Xafiiska Boosta).

Haddii aad u baahan tahay gargaar lagaa siiyo codsiyadaas la xidhiidh hay'adda qaxootiga ee degmadaada.

Marka aad uur yeelatid:

Warqad u soo dir shaqalahaaga kiiska ee UKBA adiga oo weydiisanaya lacag-siinta hooyada ee ah £3 iyo lacag-siinta hooyada ee ah hal mar ee ah £300/£250 kuna soo dar warqad ama foomka MATB1 uu soo qoray dhakhtarkaagu ama umulisadaadu oo xaqiijinaya inaad uur leedahay kuna qoran tahay taariikhda la filayo dhalasho (taariikhda umusha).

Xusuuso inaad lacag-siinta hooyada ee hal mar ah ku weydiisatid gudaha wakhtiyada ay cadeysay UKBA:

- Haddii aad qaatadi taageerada magangalyada ee caadiga ah, weydiiso £300 wakhti aan ka horeyn lix todobaad marka la filayo dhalashada ilmaha, ama laba todobaad ka dib marka ilmuhu dhasho
- Haddii aad qaadatid taageerada Qaybta 4, weydiiso £250 wakhti aan ka horeyn sideed todobaad marka la filayo dhalashada ilmaha, ama laba todobaad ka dib marka ilmuhu dhasho

Haddii aad weydiisatid ka hor wakhtiga la sheegay, waxa dhici karta in UKBA aanay ka shaqeyn codsiyada. Fadlan u hubso in aad u baahan tahay inaad markale soo dirtid gudaha wakhtiyada la sheegay. Xaaladaha qaarkood marka ay jiraan UKBA ma bixin doonto lacag-siinta hooyada ka hor dhalashada ilmaha, waxana ay rabi doontaa xaqiijin ku saabsan dhalashada ilmaha (sida cadeynta dhalashada [birth certificate]).

Fadlan la soco in haddii aanad ku weydiisan gudaha wakhtiyada la sheegay laguma siin doono lacagta.

Marka ilmahaagu dhasho:

U tag xafiiska diiwaangalinta ee degmadaada (registry office) oo dhalashada ilmahaaga sida ugu dhakhsaha badan u diiwaangali. Waxay ku siin doonaan cadeyn dhalasho oo gaaban oo bilaash ah. Waxa kale oo aad heli kartaa cadeyn dhalasho oo leh faahfaahin dheeraad ah haddii aad bixisid lacag yar. **Waxa aad u baahan tahay inaad heshid labada nooc ee cadeynta dhalashada.** Haddii aad qaadatid taageerada Qaybta 4 waxa aad UKBA weydiisan kartaa lacag aad iskaga bixisid kharashka cadeynta dhalashada ee dheer ama faahfaahsan.

Si aad hubaal uga dhigtid in ilmahaaga lagu daro taageerada lagu siiyo, waa inaad ka dib codsi qoraal ah oo aad saxaexday u soo dirtid shaqaalahaaga kiiska. Waa inaad ku soo dartid cadeynta dhalashada ee 'dheer'. Marka UKBA hesho codsiga, waxay lacag-siinta kor lagu sharaxay ku dari doontaa taageeradaada magangalyada.

Haddii lacag-siintu aanay ku bilaabmin gudaha laba ama saddex todobaad u tag hay'adda qaxootiga ee degmadaada.

Aabayaasha kaligood haya caruur da' yar waxay iyaguna raaci karaan tilmaamahan lagu weydiisanayo taageero dheeraad ah haddii hooyadu aanay joogin.

Asylum Support Partnership consists of:

North of England Refugee Service, charity number: 1091200 www.refugee.org.uk
Refugee Action, charity number: 283660 www.refugee-action.org.uk
Refugee Council, charity number: 1014576 www.refugeecouncil.org.uk
Scottish Refugee Council, charity number: SC008639 www.scottishrefugeecouncil.org.uk
Welsh Refugee Council, charity number: 1102449 www.welshrefugeecouncil.org